



QIIMAYNTA ISTICMAALKA WALXAHA XILLIGA UURKA IYO DHALMADA KU XEERAN

MAGACA MACMIILKA	MAGACA BIXIYAHA DARYEELKA	TAARIKHDA
------------------	---------------------------	-----------

Si aan kaaga caawino inaad yeelato uur iyo ilmo caafimaad qaba, fadlan ka jawaab su'aalahan soo socda.

TABAAKADA (SIGAARKA, VAPE-KA, AMA TABAAKADA LA CALALIYO)

1. Dooro weedha sida ugu fiican u qeexaysa isticmaalkaaga tubaakada:
- ☐ A. WALIGAY ma isticmaalin wax tubaako ah (waxaan cabbay wax ka yar 100 sigaar).
- ☐ B. Waxaan joojiyay isticmaalka tubaakada KA HOR intaan ogaan inaan uur leeyahay, haddana ma isticmaalo.
- ☐ C. Waxaan joojiyay isticmaalka tubaakada KA DIB markii aan ogaaday inaan uur leeyahay, haddana ma isticmaalo.
- ☐ D. Hadda waxaan isticmaalaa qaar ka mid ah waxyaabaha tubaakada ah, laakiin waan yareeyay TAN IYO MARKII aan ogaaday inaan uur leeyahay
- ☐ E. Hadda waxaan si joogto ah u isticmaalaa waxyaabaha tubaakada ah, qiyaastii sidii aan u isticmaali jiray KA HOR intaan ogaan inaan uur leeyahay.

Dhammaan dadka doorta jawaabta D ama E waa in loo soo bandhigaa gudbin.

- ☐ Bukaanku wuu diiday gudbinta adeegyada joojinta tubaakada.
- ☐ Bukaankan waxaa loo gudbiyay adeegyada joojinta tubaakada: _____

KHAMRIGA

FIIRO GAAR AH: 1 cabitaan = 1.5 wiqiyadood oo khamri adag ah (qiyaastii 40% aalkolo), 12 wiqiyadood oo biir ah, 5 wiqiyadood oo khamri ah (qiyaastii 12% aalkolo), ama 8–9 wiqiyadood oo malt liquor ah (qiyaastii 7% aalkolo).

2. Tan iyo markii aan ogaaday inaan uur leeyahay, caadi ahaan waxaan cabbaa ____ cabitaan oo aalkolo leh toddobaadkii. ☐ Midna
3. Toddobaadkii la soo dhaafay, waxaan cabbay ____ cabitaan oo aalkolo leh. ☐ Midna
4. Waxaan dareemay inay tahay inaan yareeyo cabbitaankayga khamriga.
☐ Haa ☐ Maya
5. Dadku way iga xanaajiyeen iyagoo dhaleeceynaya cabbitaankayga khamriga.
☐ Haa ☐ Maya
6. Waxaan dareemay raaxo-darro ku saabsan habka aan khamriga u cabbo.
☐ Haa ☐ Maya
7. Waxaan cabbay khamri subaxdii marka ugu horraysa si aan neerfahayga u dejiyo ama aan uga takhaluso madax-xanuunka iyo xanuunka ka dhasha cabbitaanka khamriga habeenkii ka horreeyay (eye-opener).
☐ Haa ☐ Maya
8. Waxaan dareemay raaxo-darro ku saabsan cawaaqibta ka dhalatay cabbitaankayga khamriga..
☐ Haa ☐ Maya
9. Waxaan dareemayaa inaan dhibaato ku qabo khamriga.
☐ Haa ☐ Maya

Dhammaan dadka “Haa” kaga jawaaba mid ka mid ah su'aalaha 2–9 waa in loo soo bandhigaa gudbin.

- ☐ Bukaanku wuu diiday gudbinta la xiriirta isticmaalka khamriga.
- ☐ Bukaankan waxaa loo gudbiyay adeegyada la xiriira isticmaalka khamriga: _____

DAROOGOYINKA KALE

10. Waxaan isticmaalay daroogooyinka:

Cannabis/Marijuana

(pot, grass, hash, etc.)

Kokayn

(coke, crack, etc.)

Methamphetamine

(speed, crystal meth, ice, etc.)

Daroogooyinka dhalanteedka keena

(LSD, acid, mushrooms, PCP, Special K, ecstasy, etc.)

**Daawooyinka dejinta ama kaniiniyada
hurdada**

(Valium, Serepax, Ativan, Xanax, Librium, Rohypnol, GHB, etc.)

Daroogooyinka maandooriyaha ah

(heroin, opium, etc.)

Walxaha la neefsado

(nitrous oxide, glue, gas, paint thinner, etc.)

Daawooyinka dhakhtarku qoro

(fentanyl, oxycodone [OxyContin, Percocet], hydrocodone [Vicodin], methadone, buprenorphine, etc.)

Haddii aad “WALIGAY MA ISTICMAALIN” uga jawaabtay dhammaan daroogooyinka kale – Halkan ku jooji.

11. Waxaan dareemay inay tahay inaan yareeyo isticmaalka daroogada.

☐ Haa ☐ Maya

12. Dadku way iga xanaajiyeen iyagoo dhaleeceynaya isticmaalka daroogadayda.

☐ Haa ☐ Maya

13. Waxaan dareemay raaxo-darro ku saabsan isticmaalka daroogadayda.

☐ Haa ☐ Maya

14. Waxaan isticmaalay daroogo subaxdii marka ugu horraysa si aan neerfahayga u dejiyo ama aan uga takhaluso madax-xanuunka iyo xanuunka ka dhasha isticmaalka daroogada (eye-opener).

☐ Haa ☐ Maya

15. Waxaan daroogo isticmaalayay muddo _____ sano ah. Markii iigu dambaysay ee aan daroogo isticmaalay waxay ahayd _____.

16. Waxaan la kulmay “miyir-beel” ama “xusuuso soo noqnoqda” sababtoo ah isticmaalka daroogada.

☐ Haa ☐ Maya

17. Waxaan dareemayaa inaan dhibaato ku qabo daroogada.

☐ Haa ☐ Maya

Dhammaan dadka “Haa” kaga jawaaba mid ka mid ah su'aalaha 10–17 waa in loo soo bandhigaa gudbin.

☐ Bukaanku wuu diiday gudbinta la xiriirta isticmaalka daroogada.

☐ Bukaankan waxaa loo gudbiyay adeegyada la xiriira isticmaalka daroogada: _____

FAA'IIDOOYINKA/ADEEGYADA CIIDAMADA

1. Weligaa ma ka soo shaqaysay waajibaad firfircoon oo ka tirsan Ciidamada Qalabka Sida ee Maraykanka, ka dibna ma uga baxday adeeggaas xaalado aan sharaf-darro ahayn?

☐ Haa ☐ Maya
2. Haddii ay haa tahay, ma jeclaan lahayd inaad hesho macluumaad iyo caawimaad ku saabsan faa'iidooyinka iyo adeegyada loogu talagalay halyeeyada ciidamada?

☐ Haa ☐ Maya
3. Haddii ay haa tahay, ma la wadaagi karaa macluumaadkaaga xiriirka Guddiga Halyeeyada Ciidamada ee Missouri si ay kuu siiyaan macluumaadkaas?

☐ Haa ☐ Maya

Macluumaad guud sidoo kale waxaa laga heli karaa bogga internetka ee Guddiga Halyeeyada Ciidamada ee Missouri.